**Amar lamba. 16 rep**

**Dacwada ee canshuurta dakhliga.**

## MAAMULKA WASAAYADA TALYANIGA EE SOMALIYA

## MAAMULAHA

Kadib marki la arkay dekreetada Madaxweynaha Jamhuuriyadda lamba. 2357 ee 9 Disember 1952;

Kadib markii la arkay Baaqa lamba. 8 ee 12 Maayo 1944 ee la xiriirta canshuurta dakhliga ah;

Kadib markii la aqoonsaday baahida in la naadimiyo qaabka dacwada ee canshuurta dakhliga;

Kadib markii la arkay qodobka 8 ee Heshiiska Maamulidda dhulka Somaliya;

Kadib markii la arkay qodobka 4 ee Baaqa Mabaadi'da Dastuuriga ah eek u lifaaqan Heshiiska Maamulida;

Kadib markii la arkay qodobka 4 ee dekreetada Madaxweynaha Jamhuuriyadda lamba. 2357 ee 9 Disember 1952.

## WAXAA LA AMRAY

### Qod. 1

Waxaa reeban in dacwo laga furo arrimaha Hey'adaha Garsoorka ee la xiriirya canshuurta dakhliga haddii aysan marka hore ka baaran deggin si iraadi ah oo go'aan uu ka soo saarin Maamulaha sida ku tilmaaman faqradda 4 ee qodobka 37 ee Baaqa lamba. 8 ee 12 Juun 1944.

Looma oggola in dacwo la xiriita qiimeynta macaashul macaashka la geeyo hey'adaha Garsoorka.

Waxaa decwad la furi karaa hey'adaha Garsoorka oo keliya 60 beri kadib markii la helo go'aanka idaariga ah.

Wax dacwad ah lama furi karo haddii aanan marka hore la haysinin shahaadada bixista kharajka rafcaanka.

### Qod. 2

Sharcigaanu wuxuu hirgeli doonaa maalinta lagu soo daabaco Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 27 Sebtember 1954.

Maamulaha

**Martino**